

HALKA MACLUUMAADKA AY KA HELLI KARAAN QOYSASKU

Talaalka inta lagu jiro mudada daaweynta kansarka

Immunisations during cancer treatment

Australia gudaheeda, talaalada (loogu yeero talaalo ama irbado) waxaa lagu talinayaa in dhamaan caruurta caafimaadka qabtaa ay qayb ka yihiin Barnaamijka Talaalka Qaranka ee xukuumadu maalgelisay.

Waxaa badanaa la siiyaa bilaha labaad, afraad, lixaad ama 12aad iyo 18aad, iyo saddex sano iyo bar iyo inta lagu jiro sanadaha dugsiga sarre. Talaaladaani waxay ka xafidaan ilmahaaga iyo bulshada infakshana kala duwan. In kasta oo aan lagu talinayn inta daaweynta kansarku socoto, waxaa jira kuwa si amaana loo siin

karo oo lagu talinayo. La hadal ilmahaaga dhakhtarkiisa wixii ku saabsan talaalka la siinayo inta daaweyntu socoto. Haddii aad qabto wax diidma ah waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga iyo weliba qofka ku takhasusay ee bixiya talaalka.

Waa maxay talaalka siyaadada ah ee lagu taliyey inta daaweynta kansarku socdo?

Caruurta qabta kansarka waxay khatar ugu jiraan infakshan sababtoo ah daaweynta kansarku waxay hoos u dhigtaa nadaamka difaaca. Infakshanadaan qaarkood waxaa lagaga hortegi karaa talaalka. Talaalka laga yaabo in lagu taliyo inta daaweynta kansarku socoto waxaa ka mid ah:

Talaalka hargabka "influenza" oo la bixiyo hal mar sanadii (waxa la bixiyaa sanad walba)

Hargab, waa infakshan kaas oo ka dhigi kara ilmahaaga mid aad u jiran marka ay qabaan kansar. Talaalka hargabka ayaa ah sida ugu fiican oo looga hortegi karo hargabka. Talaalku waa amaan in loo siiyo carrurta qabta kansarka si fiican ayuuna u shaqeeyaa inta u dhexaysa wareegyada. Badanaa waxaa la bixiyaa hal mar sanadii bilawga xilliga hargabka (Maarso/Abriil) laakiin waxaa laga yaabaa in la bixiyo mar walba inta lagu jiro xilliga hargabka (May ilaa Oktoobar). Qabanqaabo ayaa loo samayn karaa marka dibada loo safrayo. Talaalkaani waa lacag la'aan. Waxaa ku siin kara ilmahaaga dhakhtarkiisa guud ama waxaa qabanqaabiya dhakhtarka qaabilsan kansarka.

Talaalka teetanaha (waxaa la bixiyaa markay dhacaan dhaawacyo gaar ah)

Ilmahaaga waa in la siiyaa talaalka teetanaha haduu ku dhaco dhaawacyadaan midkood:

- markay ku goyso bir mirir leh
- marka xayawaan ku qaniino
- markay ku gooyaan waxyaalla wasakhaysan.

Talaalka teetanuhu wuxuu badanaa ka kooban yahay talaalka qiixdheerta (diphtheria iyo pertussis). Kani waa amaan marka la dawaynayo kansarka. Talaalkaan waxaa siin kara ilmahaaga dhakhtarkiisa guud, qaybta xaalladaha degdegta ah ama waxaa qabanqaabin kara ilmahaaga dhakhtarkiisa kansarka qaabilsan ama kalkaalisada joogta isbitaalka ama adeega caafimaadka oo ku dhow guriga. Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan arrintan, weydiiso kalkaalisadaada caafimaadka.

Waa socotaa



Australian & New Zealand
Childrens Haematology/Oncology Group

Mashruucani waa Deeqda Da'daalka Cancer
Australia oo Caawimaya Dadka qaba Kansarka,
waxaana kharajkiisa bixisay Xukuumada Australia



Australian Government
Cancer Australia

waa socotaa

Cudurka pneumococcal waa mid aad u daran. Wuxuu keenaa in dhiiga infakshan ku dhaco, in maskaxdu caabuqdo iyo pneumonia (infakshan feeraha ah).

Talaal ayaa waxaa siiyaa Barnaamijka Talaalka Qaranka markay da'adu gaarto laba, afar iyo lix bilood (tira guud saddex talaal). Carruurta kansarka qabta qaarkeed

waxaa laga yaabaa inay khatar ugu jiraan inuu ku dhaco cudurka pneumococcal iyo marka ilmuhu gaaro afraad (ama xoojiye) oo talaalkaan si looga hortago midkaan. Waa inaad kala hadashaa dhakhtarka ilmahaaga.

Talaalke ayaan lagu TALIN inta daaweynta kansarku socoto?

Talaalada qaarkood ayaa leh qadar yar oo fayras ah kaas oo la bedelay si amaan looga dhigo in dadku qaadan karaan. Kuwaan waxaa loogu yeeraa talaala 'nool'. Badanaa ma keenaan cudur maadaama difaaca jirku nadiifinayo infakshanka, laakiin carruurta qabta kansarka waxay leeyihiin difaac jireed oo daciifa mana awoodaan inay arrintaan qabtaan, sidaas darteed maaha in la siiyo talaaladaan inta lagu jiro daaweynta.

Kalkaalisadaada caafimaadka ayaa ku siin karta warqad aad dugsiga geyso taas oo sheegaysa marka ilmahaagu talaalka qaadanayo iyo kan aan la siinayn inta daaweyntu socoto. Haddii loo baahdo, dhakhtarkaaga qaabilsan kansarka ama dhakhtarka guud ayaa isaguna buuxin kara 'foomka ka dhaafida talaalka sababa caafimaad dartood' (tilmaanta-lidka) ee medicare si loo xaqiijiyo in lacagta xukuumadu bixiso aanay talaalka saamayn ugu yeellan.

Talaalka nool oo Barnaamijka Talaalka Qaranka ee aanay ahayn in la qaato inta chemotherapy socdo waxaa ka mid ah:

- jadeecada, qaamaaqashiirka, rubella (MMR)
- busbus

- jadeeco, qaamaaqashiir, rubella, varicella (MMRV)
- rotavirus (waxaa la siin karaa carruurta yaryar, weydii dhakhtarkaaga kansarka da'da kan la siinayo).

Waxaa kaloo jira taalaal kale oo 'nool' oo la siiyo kuwa aadaya dibada wadama mucayina. Haddii aad doonayso inaad ilmahaaga geyso dibada marka daawadu ku socoto, waxaa waajib ah inaad la hadasho dhakhtarkaaga marka hore. Talaalada soo socda oo nool maaha in la siiyo ilmahaaga inta daaweyntu socoto:

- oral polio (sabin). Tan lagama bixiyo hadda Australia waxaana bedelay talaalka boolyada ee aan kacsanayn (iPV) oo ah amaan in la qaato
- oral typhoid. Talaal kale oo noocan ah oo amaan ah ayaa la helli karaa
- Bacille Calmette–Guerin (BCG) oo looga hortago tiibishada
- yellow fever (Xumada jaallada ah)
- Japanese encephalitis (caabuq ama infakshan ku dhaca maskaxda).

Talaalada qaarkood waa amaan inta daaweynta kansarku socoto, waana lagu talinayaa.

Qodoba muhiima**Talaaladee la siinayaa xubnaha qoyska ama dadka kale ee ku nool guriga?**

Si looga xafido ilmaha kansarka qaba infakshanka, dhamaan xubnaha qoyska iyo dadka ku nool guriga waa in si buuxda loo talaalaa sida waafaqsan talada hadda jirta. Waa amaan aad ayaana loogu talinayaa in carruurta kale ay qaataan talaalkooda caadiga oo ay ka mid yihiin:

- jadeeco, qaamaaqashiir, rubella (MMR)
- jadeeco, qaamaaqashiir, rubella, varicella (MMR-V)
- busbuska (Chickenpox)
- rotavirus (oo la siiyo carruurta ka yaryar lix bilood).

Haddii qof walba oo guriga degan uu qaado busbus sida furuuruca busbuska talaalka ka dib ama MMR-V, ku dabool furuuruca (dhar ama shaafad weyn) lana xiriir dhakhtarka guud ama kansar yaqaanka.

Waxaa jirta khatar yar oo talaalka rotavirus-ka laga yaabo inuu ku fido dad kale oo ku nool guriga ilaa muddo dhan laba asbuuc ka dib marka la siiyo talaalka. Si looga fogaado tan,

samay taxadar siyaada ah adiga oo dhaqaya gacmaha oo isticmaalaya faratirtir la iska tuurayo.

Talaalada kale ee aadka loogu talinayo inay qaataan dadka kale ee guriga degan waxaa ku jira:

- talaalka hargabka oo la siiyo qof walba oo ka weyn lix bilood da' ahaan
- qiixdheer (whopping cough) – qadar xoojiye ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo dadka ka weyn 15 sanadood.

Talaalkee ayay tahay in la siiyo ka dib marka ilmuhu qaato daawada kansarka?

Ilmahaaga ayaa laga yaabaa inuu u baahdo xoojiyayaalka talaalada ilmanimada lix bilood ka dib marka talaalka la dhameeyo. Kani wuxuu ku xirnaan doona chemotherapy-ga ilmahaagu qaatay.

Marka ilmahaagu ka joogo lix bilood daaweynta, weydii dhakhtarka kansarka haddii ay tahay in la qaato talaalka xoojinta. Macluumaad intaas ka badan, fadlan ka eeg talaalka ka dib marka daaweynta kansarku dhamaato websaytka www.pics.org.au.

Cidda lagala xiriirayo su'aalla intaas ka badan.

La hadal dhakhtarka qaabilsan kansarka haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan talaalka ilmahaaga iyo qoyska. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Rugta caafimaadka ee ku taalla isbitaalkaaga. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Rugta caafimaadka talaalka ee isbitaalkaaga. Ku qor nambarada halkaan:

Namabrka telefoonka ee Isbitaalka: _____

Links-ka www.humanservices.gov.au/spw/customer/forms/resources/immu11.1310p.pdf